

# Dalbashada goobta iyo gelida waxbarashada dugsiga kahor ee Köping

KÖPINGS KOMMUN

Caruurta & Waxbarashada

Kusoo dhawaw waxbarashada dugsiga kahor iyo xanaanada caruurta ee Köping. Waxbarashada dugsiga kahor waxaa loogu talo galay caruurta da'doodu u dhaxayso 1 ilaa 5 sano jir. Halkan waxaad ka heleysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo dalban karo goobta waxbarashada dugsiga kahor iyo xarunta xanaanada caruurta, iyo waxyaabaha ugu muhiimsan ee ay tahay inaad maanka ku hayso marka goob aad ka heshid.

Si aad meel uga hesho waxbarashada dugsiga kahor ama xarunta xanaanada caruurta waa in labada waalidba ay mashquul yihiin. Tusaale ahaan, waa ay shaqeeyaan, wax bartaan ama ka duwaan gashan yihiin adeega hay'ad shaqaalaysiin, ama kaalmo loo siiyaa si ay u dagaan.

Meel kama heleysid waxbarashada dugsiga kahor si aad fasax uga gasho waalidnimada oo aad ilmaha uga nasaxato. Waxaa, laakiin, dhici karta inuu ilmahaagu dhigto waxbarashada dugsiga kahor 15 saacadood todobaadkii hadii aad doonayso inaad ka yara nasato oo aad leedahay walaal.

**Wakhti hore meel sii dalbo** Waxaa lagaaga baahan yahay inaad liiska dadka sugayaasha ah geliso ilmahaaga ee waxbarashada dugsiga kahor. Dalbo in lagu geliyo liiska dadka sugayaasha ah wakhti hore waxaad u baahan tahay goob. Waxay qaadataa ilaa afar bilood in meel la helaayi. Arjiga waxaad ku sheegi kartaa sadex ikhtiyaar oo waxbarashada dugsiga kahor ee ilmahaaga ah. Waxbarashada dugsiga kahor ee lasiinayo ilmahaaga waxay ku xidhnaanaysaa meesha banaanaata.

Online ahaan ayaan ku dalban kartaa. Marka aad meel dalbato, waxaad sidoo kale isku daraysaa liiska dadka sugayaasha ah. Waxaad dalban kartaa adiga oo isticmaalayaa adeegaayaga internetka ah, kaas oo aad ka heli karto www.koping.se, ama waanu ku caawin karnaa hadii aad soo booqato hoolka shirarka magaalada ee Nibblesbackesvägen 17.

**Macluumaad ka bixi waxa lagu mashquulsan yahay**

Marka aad meesha banaan dalbanayso, waxaa lagaaga baahan doonaa inaad shahaado cadayn ah la timaado. Hadii ay laba waalid yihiin, mid kastaaba waa inuu noo keenaa shahaadadiisa cadaynta ah si goobta loo siiyo. Waxaad shahaadada kusoo gudbin kartaa Nibblesbackesvägen 17.

**Marka aad hesho fasaxa goobta**
Waxaanu kuugu soo diri doonaa siinta goobta waxbarashada dugsiga kahor cinwaanka iimeelka aad ku sheegtay arjigaagii. Xasuusin ayaa sidoo kale boosta laguugu soo diri doonaa inta aanay dhamaan wakhtiga aad kaga soo jawaabi kartaayi.

***Waxaa muhiim ah inaad aqbasho ama diido*** goobta lagu siiyay isla wakhtiga lagaga jawaabayo dhaxdeeda iyada oo fariin gaar ah ah. Hadii aanaan wax jawaab ah kaa helin, waxaad waayi doontaa goobta aad kaga jirta liiska dadka sugayaasha ah waxayna noqonaysaa inaad dib u dalbato hadana.

**Hadii aad aqbasho goobta**
Waxbarashada dugsiga kahor ayaa taleefanka kugula soo xidhiidhi doonta si ay balan kuugu samayso kulan qoris ah kahor inta aanay bilaabmin waxbarashada dugsiga kahor. Wixii kulan qoris ah waxay waxbarashada dugsiga kahor kugula socodsiinaysaa waxa intaa kadib aad filan karto marka uu ilmahaagu bilaabo waxbarashada dugsiga kahor, iyo mudada ay tahay inay waalidku la joogaan ilmaha inta hore.




### Sheeg dakhligaaga

Si aad u sugato goobta bilaasha ah ee waxbarashada dugsiga kahor inay sax tahay, waa inaad u sheegtaa qaybta qorista dhakhliga labada waalid ee ilmaha marka goob laga siiyo waxbarashada dugsiga kahor.

### Goorta uu bilaabo ilmahaagu waxbarashada dugsiga kahor

Taariikhda bilawga ayaa ah goorta uu ilmahaagu bilaabayo goobtii la qoray. Qoraalka waxa uu qaataa ilaa laba todobaad, taas oo ay tahay in aabaha ama hooyadu ay tahay inay la joogto ilmaha waxbarashada dugsiga kahor.

### Buuxinta jadwalka

Marka uu ilmahaagu bilaabo waxbarashada dugsiga kahor, waalid ahaan waa inaad sheegtaa wakhtiga ilmahaagu imanayo waxbarashada dugsiga kahor iyo wakhtiga uu guriga qabanayo.
Waxbarashada dugsiga kahor waa inay sii ogaadaan wakhti hore wakhtiga ilmahaagu dhiganayo. Waxaad galinaysaa wakhtiga nidaamka taarisidka Tempus. Waxaan ka heleysaa halkan linkiga iyo tilmaamaha tan **www.koping.se/e-tjanstforskola**. Waxaad ka geli kartaa adeega internetka adiga oo isticmaalaya Aqoonsigaaga Bangiga Mobileka. Fadlan la xidhiidh qaybta qorista hadii aad wax caawimo ah u baahan tahay.

### Hadii ay uu yimaado xanuun ama hadii ay jiraan ciido

Waxaa mihiim ah in aad la socodsiiso waxbarashada dugsiga kahor marka ilmuhu xanuunsanayo iyo goorta aanu iman karin. Waa inaad sidoo kale noo sheegtaa mar aad fasaxa ku jirto ee aanad iman karin waxbarashada dugsiga kahor.

### Waxaa waajib ah inaad goobtaada isticmaasho

Waxaa muhiim ah inaad goobtaada waxbarashada dugsiga kahor ee ilmaha aad isticmaasho. Hadii aanad isticaalin goobtaada oo aanu ilmahaaguna iman waxbarashada dugsiga kahor mudo 30 maalmood ah, waxaad waayi doontaa goobtaas lagu siiyay. Ilmaha uma suurto gal ah inuu wixii intaa ka danbeeya yimaado waxbarashada dugsiga kahor, waana inaad dib u dalbataa in boos lagaa siiyo liiska dadka sugayaasha ah.

Waxaa jira waxyaabo laga soo reebey, hadii tusaale ahaan xanuun uu yimaado, waa inaad la socodsiisaa waxbarashada dugsiga kahor taasi. Hadii ay jiraan sababo kale, waa inaad dib uga dalbataa qaybta qorista ama madaxa qaybiyaha boosaska waxbarashada dugsiga kahor. Fadlan la xidhiidh qaybta qorista hadii aad wax su'aal ah qabto.



## Qaybta Qorista Caruurta & Waxbarashada

**Cinwaanka Booqashada** Nibblesbackevägen 17, level 2
**Saacadaha Shaqada** Isniin-Jimce 08.00-16.00, xidhan labada ciso ee fasaxa iyo ciidaha.

**I-Meelka** placering@koping.se
**Lambarka Taleefonka** 0221-255 47
**Saacada taleefanka laga soo hadli karo** Isniin-Jimce 10.00-12.00

*Waxaad nala soo xidhiidhi kartaa hadii aad wax su'aal ah qabto oo ku saabsan qoriska waxbarashada dugsiga kahor ama xarunta xanaanada caruurta*

KÖPINGS KOMMUN

www.koping.se

Sawir: Helen Shippey, iyo Dawlada Hoose ee Köping. Wax laga badalay Abriil 2018